11

Guurka iyo Furidda

SOM 011

XEERKA QOYSKA EE HAWEENKA GUDAHA ONTARIO

Haweenka oo dhan. Xeerka Qoyska waa mid.

Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Guurka iyo Furidda

Buuganyarahan waxaa loogu tala galay in lagugu siiyo warbixin gaaban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga. Ma aha beddel talada sharci ama gargaar ee qof la siinayo. Haddii aad la tacaalayso arrimaha sharci qoys, waxaa lagula talinayaa in aad hesho talo sharci sida ugu dhakhsaha badan si loo fahmo fursadahaaga iyo si loo ilaaliyo xuquuqda aad leedahay. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska kharajkiisana aad u bixin lahayd, eeg buugayagan yar ee "Helitaanka Kaalmo ee Dhibaatadaada Xeerka qoyska". Waxa kale oo laga yaabaa in aad u baahato inaad fiirsato aqoon-isweydaarsi lagala xiriiro internetka ee "Raadinta Garyaqaanka Sharciga Qoyska", "Xuquuqda Hantida iyo Waajibaadka Dad isqaba iyo kuwa isla nool", ee ku saabsan mawduucyo kale oo sharciga xeerka qoyska. Dhammaan macluumaadkan waxay ku jiraan shabakaddayada internetka ee www.onefamilylaw.ca.

Waa maxay guurka sharciga ah ee Kanada?

Si xafladda guurka ee Kanada ay u noqoto mid sharciyaysan, waxaa jira laba nooc oo shuruud ah ee ah in labada qof ay raacaan. Shuruudda hore waxay ku saabsan tahay cidda si sharci ah loo ogol yahay in ay guursadaan. Midda labaad waxay caddeyneysaa habka uu guurka u dhici lahaa.

1) Yaa wax guursan karo Ontario?

Waxaa jira sharciyo ku saabsan cidda si sharci ah isu guursan karta ama aan is guursan karin. Halkan waxa ku qoran shuruudaha muhiimka ah ee ku saabsan cidda si sharci ahaan la oggol yahay inay is guursadaan:

a) Ontario, waa in aad ugu yaraan **18 sanno jir** tahay si aad u guursato.

· Shuruudan waxaa ka baxsanaan kara haddii aad tahay 16 ama 17 sano jir ah. Haddii aad ka heshid oggollaansho qoraal ah inaad guursata, labadaada waalid, qofka masuulka si sharci kaaga ah, ama maxkamadda. Gobollada iyo degmooyinka kale waxaa ka jiro shuruudo kale ee la xiriira da'da kala duwan.

b) Guud ahaan Canada, carruurta ka yar **16 jir ma** guursan karo, xitaa haddii waalidka oggolaansho laga helo. Waxay kasoo horjeeddaa sharciga dambiyada inaad la dabaaldegto, gacan ka geysato ama ka qayb qaadato aroos haddii aad ogtahay in mid ka mid ah dadka is guursanaya u ka yar tahay 16 sanno jir.

c) Waad guursan kartaa qof kasta oo gaaray da'da sharci ahaan wax guursan kara. Kuma xirna arrintani qofkaad isguursaneysaan jinsiyaddiisa ama lab/dhedig ahaantiisa.

d) Haddii aad adiga iyo lammaanahaagu aad isu dhowdihiin, dhiigga ahaan ama korsasho ahaan, awood uma lihidin inaad is guursataan. Sharciga ayey kasoo horjeedaa inaad guursato waalidkaa, ayeeyo/awoowe, caruurtaada, caruurta aad ayeeyo/awoowe u tahay, walaalkaa ama walaashaa, walaalaha kala aabe/hooyo tihiin.

e) Haddii aad horey u guursatay oo aad xaas tahay, ma aad guursan kartid qof kale. Waxay kasoo horjeedaa sharciga Canada in qof leeyahay wax ka badan hal xaas. Taas waxaa loo yaqaannaa **xaasas badan yeelasho**.

· Haddii aad horey u soo guursatay, waa in aad caddeysaa in aydnaan qofkaas isqabin hadda, taas oo ay sabab u tahay furriin ama geeri, ka hor inta aanad guursan qof kale. Haddii furiinku ka dhacay meel Canada ka baxsan, waxaad u baahan doontaa in la caddeeyo in furiinkaas uu ahaa mid waddankaas ka sharciyeysan. (Waxaa hoos ku qoran macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan furriinka).

f) Waa in aad adiga iyo lammaanahaaguba aad fahamsan tihiin waxa ay ka dhigan tahay in aad is guursantaan. labadiinuba waa inaad si ikhtiyaar ah ku heshiisaan inaad isguursataan. Sharcigu waxa uu taas ku micneynayaa "**oggolaanshaha caddeyn ah oo la isku wargeliyay**".

· Haddii lagugu khasabay inaad guursato, kaasi ma aha guur sharci ah. Waxay kasoo horjeeddaa sharciga dambiyada inaad la dabaaldegto, gacan ka geysato ama ka qayb qaadato aroos haddii aad ogtahay in mid ka mid ah dadka is guursanaya usan raali ka ahayn guurkaas ee lagu khasbayo.

2) Shuruudaha Xaflada Guurka

Qaybta labaad ee xeerarka is guursashadu waxay ku saabsan tahay sida loo hirgeliyey ama loo sameeyey xafladda nikaaxa guurka. Haddii guurkaagu ka dhacayo Canada, waa in ay waafaqsan tahay sharciga gobolka xaflada nikaaxu ka dhacayso.

Labada qof ee is guursaneysa waa inay shaqsi ahaan goobjoog ka ahaadaan xafladda nikaaxa. Suurto gal ma aha in telefoonka ama internetka la isku guursado. Labada qof ee is guursanaya waa in ay soo hor istaagaan qofka sharci ahaan loo oggol yahay fulinta xafladda nikaaxa.

Ontario, ka hor inta aadan guursan, waa in aad hesho **shatiga guurka** kaas oo kasoo baxay xafiiska dowladda ee tuulada, magaalada ama degmada aad ku nooshahay. Shatigaas, oo lacagtiisu yar tahay, wuxuu ansax yahay muddo saddex (3) bilood ah. Waa inaad keentaa shatigaas inuu saxiixo qofka qabanaya xafladda nikaaxa guurka, meel kasta oo Ontario.

Si guurku u noqdo mid sharciyaysan ee Ontario, qofka qabanaya xafladda nikaaxa guurka waa inuu leeyahay ruqsad ama fasax ka haysto dawladda. waxaad xafladda nikaaxa guurka ku qaban kartaa meel diineed ama si madani ah (aan ahayn meel diineed) ee Ontario.

- xaflad Nikaaxa ee Diiniga ah: Sarkaal si rasmi ah uga diiwaangashan Ontario inuu qabto xaflad nikaax guur, ayaa si sharci isu kiin guurin kara, sida baaderi kiniisadeed, wadaad kiniisadeed, wadaad Yuhuudda ama Imam.
- xaflada nikaaxa guurka ee Madani ah: Garsoore, Wakiilka nabadda ee caddaaladda, xoghaynta magaalada ama qof kale oo shati u leh fulinta guurka ee Ontario ayaad hortooda si sharci ah isku guursan kartaan.

Shahaadada guurka waa warqad rasmi ah oo cadaynaysa in aad si sharci ah isu guursateen. Waxaad ku heli kartaa shahaadada guurka haddii laba qof oo marqaati ka ahaa xafladdii nikaaxa guurkiina ay saxiixaan shahaada guurka, iyada oo qofkii qabtay xafladda nikaaxa guurka in shahaadada guurka iyada oo la saxiixay lana buuxiyey uu u diro xafiiska diiwaanka gelinta guurka ee dawladda. Ontario, xafiiskaas waxaa la yiraahda Adeegga Ontario.

Guurarka ka dhacay waddamada kale Canada sharci ma ka yihiin?

Inta badan, guurka si sharci ah meel Canada ka baxsan ka dhacay waxaa loo aqoonsanayaa inuu sharciyeysan yahay. Haddii aad ku nooshahay Canada oo aad tagto wadan kale inaad soo guursato, xaflad nikaaxu waa in ay waafaqsan tahay shuruudaha guurka ah ee dalkaas aad kusoo guursatay. Si guurkaas uu u noqdo mid saxa ee waafaqsan sharciga Canada, waa in aad sidoo kale raacdo xeerarka ku saabsan cidda loo oggol yahay in ay isguursadaan ee sharciga Canada (ee kor lagu soo xusay).

Xaasas badan yeelasho

Waa in aad ogaato in qof xaasas badan leh (loona yaqaan "xaasas badan") inay kasoo horjeedo ama dhan ka tahay sharciga Canada. Haddii aad isku guursateen waddan xaasas badan yeelashadu ay sharci ka tahay, halkan hal guurka oo laba qof ayaa loo aqoonsanayaa oo keliya inay sharci tahay.

Waxaa jiri kara laba cawaaqib xumo ee dembiyada, iyo socdaalka haddii aad usoo haajirtay Canada, ee la xiriira xaasas badnaan. Haddii aad ka welwelsan tahay sida xaasas badan ay saameyn kugu yeelan karto, qareen sharciga dembiyada iyo qareen ah sharciga socdaalka ayaa kaa caawin kara.

Inkasta oo guur xaasaska badan u Canada ka yahay mid sharci darro ah, haddii xiriirka adiga iyo waalidkii kale ee ilmuha isu dhasheen uu dhamaado, waxaad laga yaabaa in ay weli leedahay xuquuqda ababibta ilmaha, masruufka caruurta, masruufka xaaskii hore iyo hantida qoyska sida waafaqsan sharciga qoyska ee Ontario.

Haddii aadan hubin in guurkaagu u sharci ka yahay Canada, ama haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan xuquuqdaada iyo xuquuqda ay leedahay carruurtu, waxaa muhiim ah in qareen ka mid ah sharciga qoyska ka hesho talo sharci.

Si toos ah miyaan u noqonayaa muwaadin Canadian ah haddii aan guursado qof muwaadin Canadian ah?

Guurka muwaadin Canadian ah si toos ah kuuma siinayo dhalasho Canadian ah. Waxaa jira habka gaarka ah in la raaco si aad u noqotid muwaadin Canadian ah iyo shuruudo loo baahan yahay inaad buuxiso si aad u dalbato dhalshada. Ma jiro hab gaar ah ee loogu talagaalay dadka guursada muwaadiniinta Canadianka ah. Hase ahaate muwaadin Canadian ah ama haysta deganaanshaha joogtada ah ayaa suurigal ah inay kafaala qaadi kara in xaaskiisa/ninkeeda inay Canada ku noolaadaan iyaga oo haysta degganaansho joogto ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah, oo ku saabsan deggenaanshaha joogtada ah, kafaala qaadka ama dhalashada, eeg bogga internetka ee **Xafiiska Dhalashada** iyo **Doolaalka ee Canada ee www.cic.gc.ca**. Waxaad kale oo aad ka akhrisan kartaa buug yarahayaga "Xeerka Arrimaha Qoyska ee soo galootiga, Qaxootiga iyo Haweenka aan sharciga laahayn".

Furniinka iyo Kala-tagga ee Canada.

Furiinku waa marka si sharci ah guurkaagu u dhamaado. **Kala taggu** waa marka laba qof oo is qaba ama isla socday iyaga oo xiriir leh hase ahaatee aan is guursan ay go'aansadaan in xiriirkoodu dhamaado oo qof kasta noloshiina gaar ahaan u noolaado.

Haddii aad isqabtaan waad kala tagi kartaan xitaa idinka oo aan si sharci ah isu furin. Laakiin, haddii adiga ama lammaanahaagu uu doonayo in uu guursado qof kale, waa in aad heshaan marka hore furiin sharci ah.

Burburka qoysku waa dhibaato adag, waana waqti walaac leh. Haddii adiga iyo lammaanahaagu aad isfurtaan ama kala tagtaan, waa in aad si wadajir ah u xallisaan arrimo badan oo sharci ah. Waa inaad go'aan ka gaartaan arrimaha ku saabsan taageerada maaliyadeed, sidii aad u maareeyn lahaydeen Qorshaha daryeelka carruurtiina, iyo qeybinta hantida qoyskiina.

Xaalad kasta uma baahna qareen, laakiin dhibaatooyinka badan ee sharciga qoyska, waxaa muhiim ah inaad hesho talo sharci. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u heli lahayd qareen arrimaha xeerka Qoyska lacagtiisana u bixin lahayd, fiiri buugyarahayagaFLEW ee "*Raadinta Taagyeero ee dhibaatooyinka Xeerka Qoyska*".

Labada qof ee isqaba haddi ay rabaan inay isfuraan oo si sharci ah ku dhamaado guurkoodu waa inay Amar Furiinka ka helaan maxkamadeed. Haddii aad heshaan oggolaansho furiinka, isla markaasba waxaad ka codsan kartaa Maxkamadda inay go'aamiso arrimaha kale ee sharciga qoyska sida qeybinta hantida qoyskiina, lacagta taagyeerada adiga iyo ilmahaaga, iyo qorshayaasha waalidnimada in waalid uu helo xannaanaynta ama ka warqabka inay soo booqdaan carruurta.

Haddii aad kala tagtaan, laakiin adnaan isfuriin, weli waxaad weydiisan kartaa maxkamada in ay go'aan ka gaarto Arrimaha lasoo xusay.

Adiga iyo lammaanahaaga sidoo kale waxaad qorsheysan kartaan si gaar ahaaneed arrimaha ku saabsan hantida, lacagaha taageerada iyo barbaarinta carruurta, iyada oo aydaan tagin maxkamadda. Waa fikrad fiican in aad ku qortaan heshiiskiina warqadda Heshiiska kala Tagga. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Heshiiska Kala Tagga ka heli kartaa website FLEW.

Sidee ayaan ku heli furiinka?

Si aad u dalbato furiin ee Kanada, waa in adiga ama xaaskaagu ku nooleydeen Canada ugu yaraan muddo hal sano ah, ka hor inta aydnaan codsan furiinka. Waa in aad ka dalbato furiinka Maxkamadda aqoon u leh sharciga qoyska, idinka isku soo dubaridaya waraaqaha loo yaqaan Codsiga. **Codsiga furiinka** wuxuu bilaabayaa nidaamka maxkamadda iyo caddeyn waxa aad rabto inay maxkamada go'aan ka gaarto iyo amar ka bixiso.

Uma baahnid ogolaansho saygaaga/naagtaada in aad dalbato furiin. Ama adiga ama xaaskaaga ayaa si gooni ah u gudbin kartaa Codsiga ah furiinka ama labadiina ayaa si wadajir ah u gudbin kara dukumentiyada. Tan waxaa loo yaqaannaa **Codsiga Wadajir**. Codsigiina waxaad ku codsan kartaa furiin keliya, ama waxaad weydiinsan kartaan maxkamada in ay go'aamiso arrimaha ku saabsan haynta ilmaha, taakuleynta dhaqaale ee ilmaha iyo masruufka xaaska, iyo sida loo kala qeybsan lahaa hantida qoyska waqti isla mar ahaantaas. Waxaad gudbin kartaa Codsiga shaqsi ahaan adiga oo aan ubaahan qareen.

Si aad u hesho furiin, waa in aad soo caddeysaa in guurkiinu uu burburay oo ayna jirin fursad dambe

ee wada xaajood dib u heshiisiin. Waxaa jira saddex siyaabood ee arrintan lagu sameyn karo:

1. Kala Noolaasho Gooni Gooni ah: Habka ugu badan ee muujinaya in guurkiinu uu burburay waa kala noolaasho "kala fogaan iyo gooni" adiga iyo xaaskaaga ugu yaraan **hal sano**. Gooni ayaad u kala noolaan kartaaan "kala foggaan iyo gooni" xitaa haddii aad weli ku wada noosihiin isla guri adiga iyo xaaskaagu, ilaa iyo inta aad marnaba u dhaqmeyn sida laba qof oo is qaba. Haddii aad isku daydo in aad ka shaqeyso in guurka soo hagaago inta lagu jiro sannadka kala maqnaanshaha, xitaa haddi xiriirkiinu soo noqdo in ka yar 90 maalmood, wali waxaa la idiin xisaabinayaa inaad kala maqan tihiin.

Waxaad codsan kartaa furiin sida ugu dhaqsaha badan marka aad kala tagtaan xaaskaaga, laakiin Maxkamadda ma idin siin doono furiinka ilaa aad adiga iyo xaaskaagu aad kala maqneydeen muddo hal sano ah oo buuxda.

2. Gogoldhaaf: Waxa kale oo suuragal si aad u hesho oggolaansho furiin haddii labadiina mid ka mid u gogoldhaaf sameeyo. Gogoldhaaf waa marka qof xaas u xirrir hoose la yeesho qof kale oo ayna isqabin.

3. Xadgudubka/cadaawada: Waxaad codsan kartaa furiinka haddii qofka aad isqabtaan u kugu sameeyo naxariisdarro jireed ama maskaxeed (xadgudub) ee aadan mar dambe la noolaan karin.

Markii ay timaaddo goggoldhaf iyo naxariisdaro ah, uma baahnid inaad sugto hal sano in furitaanka aad heshi. Laakiin waa inaad keentaa caddeyn inay jirto goggoldhaaf ama naxariisdarro/xadgudud waayo

kiisaaska noocan ka midka ah waxay leeyihiin culeys iyo kharaj badan. Mararka qaarkood, nidaamka maxkamadda waxay noqon kartaa mid jiitanta oo sababaha kore ee loo isticmaalayo in furiin lagu helo lagama yaabaa inay ka dhaqso badan yihiin waqtiga halka sano ah oo "gooni- gooni" loo kala noolaa. Waxaa muhiim ah inaad qareenka arrimaha xeerka qoyska ka hesho talo sharci ah si ay kaaga caawiyaan inaad fahamto habka ugu fiican ee xaaladdaada .

Ma sharciyeysan yahay Canada furitaanka waddan kale kadhacay?

Waxa jira habab badan ee furiinka ka dhaca waddama kale loo aqoonsanayo inuu sharci ahaan sax yahay Canada.

1. Haddii adiga ama xaaskaaga ku nooleydeen dal kale ugu yaraan hal sano ka hor inta aadan codsan furitaanka, markaas haddii furriin yimaado, waxaa loo aqoonsanayaa inuu Canada mid sharci ah yahay.

2. Haddii qofka codsada furiin ee waddan kale u caddayn karo inuu leeyihiin "xiriir ama xididdo qotodheer" ee wadankaas, markaas haddii furriin loo oggolaado, waxaa loo aqoonsan doonaa Canada inuu sharci ka yahay, xataa haddii labada qof ee xaaska ahi ay ku noolaayeen waddankaas in ka yar hal sano ka hor inta ayna codsan furiinka.

Siyaabaha ka midka ah ee muujinaya "xiriir ama xididdo qotodheer" ee waddankaas waxa ka mid ah inaad asal ahaan ka soo jeedaan dalka oo halkaas ku laabatay markii aad xiriirki xaasku burburay, ama haddii qofka dalbatay furiinka u waddankaas ku leeyahay hanti, ama u waddankaas furiinka siiyey u inta badan ku nool yahay.

Haddii furriinkaagu ka dhaco waddan kale, waxaa laga yaabaa in saameyn ku yeelato xuquuqda sharciga qoyska ee taakuleynta dhaqaale iyo qeybinta hantida qoyska ee Canada. Haddii aad qabto wax welwel ah oo ku saabsan furriinka ka dhacay waddan kale, waa fikrad wanaagsan markaas inaad la hadasho qareen sharciga qoyska ka mid ah.

Haddii furriinkaagu ka dhacay waddan kale, oo aad rabto inaad Canada qof kale ku guursato, waa in aad tustaa cadeyn furriinkaaga si ay suurigal kugu noqoto inaad halkan ku guursatid.

Si arrintan loo sameeyo, waa in aad haysataa nuqulka rasmiga ah Amarkii Furiinka. Waxaad u baahan doontaa warqad ka socota qareen Canada ee gobolka ama degmada aad rabto inaad ku guursato, kaas oo sheegaya in furiinkii hore ahaa mid sharci ahaan looga aqoonsan yahay Canada.

Haddii Amarka Furiinku usan ku qorneyn Ingriis, Faransiis, waxa kale oo aad u baahan doontaa in Ingriis ama Faransis loo tarjumay lagu turjuma taas oo u saameynaya Turjumaan sharci u leh turmadda. Qareenka ayaa sidoo kale kaa caawin kara arrintan.

Caqabadaha diinta ee hortaagnaan furtaanka iyo dib-u-guursashada.

Maxkamadda ayaa bixin karta oggolaanshaha furiinka labada isqabta ee isku guursaday si madani ama diini ah. Hase ahaate diimaha qaar ka mid ah ma aqoonsana furitaanka iyaga oo oran kara in haddii furiinku ku dhacy hab madani ah (diinta ka baxsan, kama qayb qaadan kartaan Arrimaha diineed ee bulshada ama aadan ku guursan karin mar kale

xaflad nikaax ee diineed. Xeerka qoyska ee Canada kuma siinayo xuquuqda aad ku guursatid Diintadaa. Laakiin qof kasta oo buuxiya shuruudaha sharciga ah (kor lagu xusay) wuxuu xaq u leeyahay Canada inuu ku guursado si madani ah.

Xeerka qoyska ee Canada kuma qasbi karo qofka aad isqabtaan inaad nidaam diini ah ku furtid. Laakiin sharciga Canada wuxuu leeyahay qofka aad isqabtaan uma isticmaali karo ballanqaad ama diidmada furiin isaga oo uga dan leh ka faa'ideysiga ama qiil u helid go'aan ka gaarista arrimaha la xiriira xeerka Qoyska.

Haddii qofkii hore ee aad isqabteen uu isku dayo inuu kaa horistaago inaad hab diini ah ku guursatid bulshadaada, maxkamadda waxay diidi kartaa qofkaas aad isfurteen codsigiisa la xiriira xeerka Qoyska ee xanaaneynta ilmaha, taageerada dhaqaale ama qeybinta hantida qoyska.

Kala Tagga Laba Qof ee Isla Nool

Labada qof ee isla nool, laakiin dooratay in ayna si sharci ah isuguursan, waxaa mararka qaarkood loo yaqaan "**Wada Noolaasho caadi ah**". labada qof ee wada-noolaashuhu ka dhexeeya waxay soo afjari karaan xiriirkooda iyaga oo kala taga. Uma baahnid in aad si aad u hesho oggollaansho furiin haddii idnaan markii horeba si sharci ah isu guursan.

Gobolka kasta wuxuu leeyahay sharciyo kala duwan oo ku saabsan sida loo arko inay tahay "Wada Noolaasho caadi" ah ee laba qof, iyo waxa xuquuqda qoys ee sharciga ah ee ay leeyihiin laba qof ee wada nool marka ay kala tagaan. Ontario, labada qof ee wada-nool haddii ay kala tagayaan waxaa ay leeyihiin xuquuq dhinaca xeerka Qoyska ee u gaar ah haddii:

- Ay wada degganaayeen 3 sano ama in ka badan, ama
- Haddii ay isu dhaleen ilmo iyo ay lahaayeen xiriir joogto ah.

Labada qof ee isla-nool ee Ontario waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan haynta ilmaha ama soo booqashadooda, taakuleynta ilmaha, iyo masruufka xaaska marka ay kala tagaan.

Inkasta oo sharcigu u aqoonsan yahay xiriirka isla-noolashaha siyaabo badan, haddana sharciga ku saabsan qeybinta hantida qoyska marka laba qof ee isqabta ay kala tagaan ma u khuseeyo marka laba qof ee isla-nool ee Ontario ay kala tagaan. Mararka qaarkood, haddii aad soo afjareysaan xiriirki isla-noolashaha, Maxkamadda waxay amri kartaa inaad leedahiin xuquuqda wadaagga hantida qoyska oo aydnaan idinku si gooni gooni ah u lahayn.

Go'aaminta arrimaha qoyska dhamaadka xiriirkiinna

Haddii aad kala tageysaan ama aad isfureysaan, adiga iyo lamaanahaagu waxaad sameysan kartaan qorshe ku saabsan lacagta iyo Arrimaha qoyska iskiin ama idiinka oo caawimaadda ka helaya qareen sharciga ama maxkamadda.

Haddii aad adiga iyo lammaanahaagu si fudud iyo si daacad ah u wada hadli kartaan, waxaad samaysan kartaan heshiis idiin gaar ah oo ku saabsan sida loo xallin lahaa arrimaha sharciga qoyska, sida haynta caruurta, iyo soo booqashada, taagyeerada ilmaha, masruufka xaaska iyo qeybinta hantida qoyskaaga. Waa fikrad fiican inuu heshiiskaas noqdo mid qoraal ah, oo leh taariikhda, ayna labada qofba saxiixaan.

Waxaa aad u fiican haddii qof kasta uu helo qareen u gaar ah oo eego heshiiska, oo markaas ka diiwaan geliyo Maxkamadda. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Xalinta Khilaafaadka Noocyada kala duwan ah (heshiis ka baxsan Maxkamadda) iyo Heshiisyada KalaTagga internet website FLEW.

Haddii aad adiga iyo lammaanahaaga ku heshiin karin, ama haddii xiriirkiinu ahaa mid dibindaabyo, waxaa u ammaano badan inaad hesho qareen markaasna aad ku talagashid inaad tagto Maxkamadda sidii xal loogu heli lahaa arrimaha ku saabsan qabanqaabada waalidnimada, taageero dhaqaale iyo sida loo kala qeybsan lahaa hantida qoyska.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda xeerka qoyska ee furiinka iyo kala tagga ka bacdi, fiiri buug yarahayaga ku saabsan: "Xannaanaynta iyo Booqashada ilmaha", "Masruufka Caruurta", "Taageeridda Xaaska", "Heshiisyada Qoyska", iyo "Sida loo Qaybiyo Hantida ee Xeerka Qoyska".

Fikradaha halkan lagu muujiyey qoraalladan waa fikradaha FLEW sidaas darteed kama turjumeyso fikradaha Gobolka.

Inkastoo ay qoraaladan taageero dhaqaale ka heleen Uruka Sharciga ee Ontario, waxyaabaha ku qoran daabacaadan kama tarjumeyso aragtida Ururka.

Waxaa jira halis weyn oo gacan ka hadal ah markii xiriir kalgacal ah u burburo. Haddii aad ku sugan tahay khatar degdeg ah, wac 911. Haddii adiga ama qof aad taqaan u halis ku jiro, booqo bogga FLEW website wixii macluumaad ah ee ku saabsan helitaanka taageero.

Haddii aad tahay qof dumar ah ee fransiiska ku hadala oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay inaad heshid adeegyada luuqadda Faransiiska marka ay socoto maxkamadda xeerka qoyska. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir qareen, Xarumaha sharciga ee bulshada, ama khadka taageerada Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u heli lahayd adeegyada Faransiiska boggayaga internetka www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Xeerka Qoyska ee Soomaali ah oo diyaarka ah*

1. Waxyaabaha kala duwan ee Xallinta Khilaafaadka iyo Xeerka iyo Qoyska (SOM 001)
2. Sharciga Badbaada Carruurta iyo Qoyska (SOM 002)
3. Masruufka Caruurta (SOM 003)
4. Sharciga qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)
5. Xannaanaynta iyo Booqashada Caruurta (SOM 005)
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
7. Waan-waanta Xeerka Qoyska (SOM 007)
8. Xeerka Qoyska sida kuwa soo haajiray, qaxootiga iyo Haweenka Sharciga Lahayn (SOM 008)
9. Helitaanka macaawinta ee dhibaatooyinkaaka xeerka qoyska (SOM 009)
10. Sida loo Qaybiyo Hantida ee Xeerka Qoyska (SOM 010)
11. **Guurka iyo furidda (SOM 011)**
12. Taagyerada xaaska (SOM 012)

** Buugan waxaa la heli karaa isaga oo qaabab iyo luuqado kala duwan. Fadlan fiiri www.onefamilylaw.ca wixii macluumaad dheeraad ah. Waxa kale oo aad ka heli kartaa qoraallo dheeraad ah bogga internetka ee kaa caawinaya in aad fahamto xuquuqdaada qoran xeerka qoyska .*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

The Law Foundation of Ontario

Funded by: / Financé par :
Ontario

Fikradaha lagu muujiyey qoraaladan waa fikradaha FLEW sidaas darteed kama turjumeyso fikradaha maalgaliyayaasha.